

Soo jiidashada dadka hibooyinka leh ee dunida si loo buuxiyo firaaqa ka jira suuqa shaqada

Janaayo 18, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dowladda Alberta waxay ka shaqaynaysaa sidii ay usoo jiidan lahayd dad cusub oo yimaada si ay uga caawiyaan koritaanka dhaqaalaha waxna looga qaban lahaa shaqaale yaraanta ka jirta laamaha shaqo ee muhiimka ah.

Dhaqaalaha Alberta si xooggan ayuu usoo kabtay arrinta ugu weyn ee caqabadda ku ah in uu sii korona waa shaqaale yaraanta. Dowladda waxay isbadalo ku samaynaysaa Alberta Advantage Immigration Program (AAIP) taasoo kordhinaysa fursadaha shaqaalaha caalamka ka imanaya ee aadka loogu baahan yahay kuwaas oo qaraabo ku leh Alberta si ay u buuxinayaan boosaskaas.

AAIP waa barnaamij soogalooti oo dhaqaalaha lagu kobcinayo kaasoo Alberta u oggolaanaya in ay xulato shaqaalaha u qalma degenaanshaha rasmiga ah. Haddii dadka dhawaan yimid ay haystaan nidaam taageeraya marka ay shaqada ka aqbalayaan gobolka, waxay u badan tahay in ay si fudud ula qabsan doonaan dhaqanka iyo bulshada cusub. Marka laga tagoinay fudaydinayso la qabsiga nolosha Alberta, wuxuu sidoo kale gacan ka gaysanayaa in shaqaalahaas lasii haysto muddo dheer.

Khubarada warshaduhu waxay saadaaliyeen in Alberta ay wajihi doonto shaqaalo yari 2025 ayada oo ay sabab u tahay warshadaha oo koraya iyo shaqaalaha oo howlgab noqonaya. Wakhti xaadirkaan Alberta waxaa ka bannaan 100,000 oo shaqooyin ah gobolka dhexdiisa guud ahaanba laamaha kala duwan. Laamaha baahida qaba waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, dhismaha, waxbarashada, teknoolojiyadda iyo injineeriyadda.

Macluumaad Kooban:

- Diisambar 2022, Alberta waxay heshay 41,000 oo ah shaqooyin cusub oo joogto ah taasoo wadar ahaan ka dhigtay ku dhawaad 94,000 oo ah shaqooyinka joogtada ah 2022. 221,000 oo ah shaqooyinka joogtada ah ayaa lagu soo kordhiyay Alberta bilowgii 2021.
- Alberta waxay saadaalinaysaa in guud ahaan shaqo yaraan gaaraya 33,100 shaqaale uu ka dhici doono marka la gaaro 2025 tanoo saamayn doonta dhowr mihnadood, heerar xirfadeed iyo laamo badan
- AAIP waa barnaamij soogalooti oo dhaqaalaha lagu kobcinayo kaasoo Alberta u oggolaanaya in ay xulato dad u qalma degenaanshaha rasmiga ah.
 - Dadka la xulanayo waa in ay lahaadaan xirfaddii ay ku buuxin lahaayeen boosaska shaqo ee bannaan ee ka jira Alberta ayna awood u leeyihiin in ay mas'uul ka noqdaan qoysaskooda.
- Hay'adda Socdaalka, Qaxoontida iyo Dhalashada ee Canada (IRCC) ayaa jaan goysa tirada dadka ee ay xulanayso AAIP sannadkii:
 - 2022, AAIP waxay soo saartay 6,500 aqoonsi oo magacaabis ah kuwaas oo ay IRCC u qoondaysay soogalootida xirfadda leh iyo kuwa aan xirfadaha dhexdhexaadka ah leh oo todoba siyaabood oo soogaleetiga ah.
- 3,120 aqoonsi waxaa lagu qoondeeyay barnaamijka Alberta Express Entry Stream.

Macluumaadka la xiriira

- [Alberta's Occupational Outlook \(2021-2030\)](#)
- [Alberta Advantage Immigration Program - Macluumaadkii ugu danbeeyay](#)
- [Alberta Express Entry Stream](#)

Su'aalaha saxaafadda

[Garrett Koehler](#)

780-554-5777

Xoghayaha Saxaafadda, Ganacsiga, Socdaalka iyo Isku dhafnaanta dhaqamada